UNIT 4: THE WORLD OF COLOR / WEEK 3

# Home Link - Somali




**Home Links Xirriirinta Guriga Cutubka 4: Dunida Midabka: Toddobaadka 3**
Qoysaska Qaaliga ah: Cutubkan wuxuu ilmahaagu baran doonaa midabada. Isku day ugu yaraan saddex kamid ah hawlahan waxbarasho ee xiisaha leh, ama dhamaantood samee! Waxa ugu muhiimsan waa inaad ku raaxaysato wakhtiga yar ee uu cunugaagu wax ku baranayo waxa ka dhacaya fasalka. Fadlan midabee sanduuqyada hawlaha aad doorato, kuna soo celi foomkan dugsiga Isniinta soo socota.
**XARAABEYSO!**

Magaca Ilmaha: ________________________________

## Xisaabta

**Ugaashiga Afargeeska:**
Afargeesku wuxuu leeyahay 4 dhinac oo toosan oo isku xiran dhamaantood, dhinacyadu iska horjeedana cabbirkoodu waa isku mid. Raadi 5 shey oo afargees ah iyo 5 oo AAN AHAYN afargees Ka hadal sida ay u kala duwan yihiin.

**Bilaawayaasha Wadahadalka:**
- Sidee ayay tani u tahay _____ afargees?
- Sidee ayay tani AANAY u AHAYN _____ afargees?

## Luqadda

**Waxaan Basaasayaa Midabada Dibada:**
Ka codso ilmahaaga inuu kaala qeybqaato ciyaarta waxaan basaasayaa adigoo isticmaalaya midabada dibada. U sheeg ilmahaaga "Waxaan ishayda yar ku basaasayaa wax ______ (cagaaran)." Weydii ilmahaaga in uu qiyaaso waxa aad basaasaysid. Kadibna ka codso ilmahaaga inuu markiisa noqdo "Wax basaasaha."

## Hadal iyo Akhris Wadajir Ah
**(20 daqiiqadood)**

**Lagu bilaawayaasha Wadahadalka:**
- Waa maxay qeybta sheekada ka mid ah oo aad ugu jeceshahay?
- Waa maxay waxa ugu horreeya ee ka dhaca sheekada?
- Maxaad u maleyneysaa in uu yahay waxa soo xiga oo dhici doona?

## Dhaqdhaqaaqa Weyn

**Ka Boodida iyo Ku Boodida Lambarada:**
Ku tus ilmahaaga lambarka farahaaga (1-10). Kala bood ama kula bood lambar ilmahaaga adigoo si sare ah ula tirinaya.

**Bilaawayaasha Wadahadalka:**
- Miyaad jeceshahay inaad ka boodo ama ka boodid qaarkale? Waa maxay sababtu?
- Maxay tahay dhaqdhaqaaqyo kale oo aan isku dayno?

## Wax Akhrinta iyo Qorida

**Wada heesa:**
Tani waa hees ah in ilmahaagu uu yaqaano.

**Apples and Bananas**
I like to eat, eat, eat apples and bananas.
I like to eat, eat, eat apples and bananas.
I like to ate, ate, ate ay-ples and ba-nay-nays.
I like to ate, ate, ate ay-ples and ba-nay-nays.
I like to eat, eat, eat ee-ples and bee-nee-nees.
I like to eat, eat, eat ee-ples and bee-nee-nees.
I like to ite, ite, ite i-ples and by-ny-nys.
I like to ite, ite, ite i-ples and by-ny-nys.
I like to ote, ote, ote oh-ples and bo-no-nos.
I like to ote, ote, ote oh-ples and bo-no-nos.
I like to oot, oot, oot oo-ples and boo-noo-noos.
I like to oot, oot, oot oo-ples and boo-noo-noos.

# Buug-gelinta Akhrinta

Hubi maalin walba in adiga iyo ilmahaaga aad wada akhrisaan sheeko. Buugagta waxay noqon karaan kuwa ah af Ingiriisi ama luuqada gurigaaga. Booqo maktabadda dadweynaha xaafaddaada si aad u hesho buugaag badan oo ku saabsan midabada!

Isniin ______ Talaado ______ Arbaco ______ Khamiis ______ Jimco ______ Sabti ______ Axad ______

**Buugaga aan ku akhrino dugsiga:**

*The Lion and the Little Red Bird*
qorey Elisa Kleven

**Buugaag kale adiga iyo ilmahaaga laga yaabo in aadjeclaataan:**

*Cat's Colors* qorey Jane Cabrera
*Brown Bear, Brown Bear, What do you See?*
qorey Bill Martin Jr.

# Tallooyinka si Wadajir ah u Akhrinta:

- Wada fadhiista meel xasilloon oo degan.
- Marka aad akhrinayso, iftiimi oo qeex erayada cusub. Tusaale ahaan, "**Enchanted** macnaheedu waa in laga yaabiyo iyo lagaa farxiyo."
- Marka aad akhrinayso, weydii ilmahaaga su'aalaha ku saabsan buugga. Tusaale ahaan, "Sidee ayuu shimbirta cas ee yari u caawisay libaaxa?"